# Cudur sida jabtada oo kale ah (klamydia), macluumaadka dadka bukaan socodka ah

## Waa maxay sababta aan anigu u helay macluumaadkan?

Waxaad qabtay, ama lagaaga shakisan yahay, in lagu qaadsiiyey cudurka sdia jabtada oo kale ah. Halkan waxaad ku heleysaa macluumaad ku saabsan cudurka sida jabtada oo kale ah, sida loo daweeyo iyo waxa aad u baahan tahay inaad samayso.

## Waa maxay cudurkan sida jabtada oo kale ahi (klamydia)?

Cudurkan sida jabtada oo kale ahi (klamydia) waa cudur caadi ah oo ay keento bakteeriyadu. Haddii aad qabtid, cudurku wuxuu kaaga dhici karaa kaadi mareenka, siilka, malawadka. Mararka qaarkood waxaa sidoo kale laga heli karaa dhuunta.

### Ma dareemayaa haddii uu aniga igu dhacay cudurka jabtada oo kale ah?

Dadka inta badan ee qaba cudurkan ma laha wax astaamo ah, waxaa laga wadaa ma dareemaysid inaad qabto caabuqa. Waxaad qabi kartaa cudurkan wakhti dheer, mararka qaarkood dhowr sano, adigoon dareemin.

Qaar ayaa laga yaabaa inay dareemaan wax yar oo hafeefasho ah markay kaajayaan.

Dumarku waxaa laga yaabaa inay yeeshaan dheecaan dhiig leh iyo/ama ay xanuun kaga dhaca qaybta hoose ee caloosha. Raggu waxaa laga yaabaa inuu dheecaan cadaan ahi ka soo baxo kaadi mareenka oo ay xiniinyuhu xanuunaan. Haddii aad galmo dabada ah samaysay, waxaa laga yaabaa inuu dheecaan ka soo baxo malawadka ama dabada.

### Cudurkan sida jabtada oo kale ahi ma khatar baa?

Haddii aan laga daaweyn dumarka wuxuu dhaawac ka soo gaari karaan ugxan-sidayaasha taas oo keeni karta inay ku adkaato inay uur yeeshaan ama ay u horseedo in ilmaha uurka ku jiraa uu ku abuurmo meel ilmo-galeenka ka baxsan (uu ku abuurmo meel aan ahayn ilmo galeenka). Raggu wuxuu infekshan kaga dhici karaa xiniinyaha. Cudurkan jabtada oo kale (klamydia) wuxuu sidoo kale keeni karaa caabuq ku dhaca indhaha iyo mararka qaarkood xanuun ku dhaca kalagoysyada.

## Sidee loo kala qaadaa cudurkan jabtada oo kale (klamydia)

Cudurkan jabtada oo kale ah waxaa lagu kala qaadaa galmada siilka ee aan la gashan wax difaac ah, galmada dabada ama galmada afka. Waxaa kale oo lagu kala qaadi karaa galmada istiinka ama salaaxa iyo galmada qalabka ciyaaraha. Cudurkani aad ayuu u faafaa xitaa haddii aanay lahayn wax astaamo ah adigu.

Cudurkan jabtada oo kale ahi maaha cudurrada dhugmarka leh sidaas darteed waxaad u qaadi kartaa cudurkan dhowr jeer.

Cudurkan jabtada oo kale ah **laguma** kala qaado dharka, tuwaalada/shukumaanada ama musqulaha.

## Sidee loo daweeyaa cudurkan jabtada oo kale ah oo ilaa muddo intee ah ayaan anigu cudurka gudbin karaa?

Cudurkan waxaa lagu daaweeyaa antibiyootik (kiniinno). Daawadu waa bilaash. Infekshanku wuu kaa baxayaa haddii aad daawada u qaadato sidii la rabay oo aad raacdo talooyinka lagu siiyey. Toban maalmood kadib markaad qaadashada kiniinka antibiyootiga, wixii ka dambeeya ma sii gudbin kartid cudurka. Haddii aad qaadato daawadaada, uma baahnid inaad samayso baaritaan kale si loo ogaado inuu infekshankii kaa baxay iyo in kale. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad uur leedahay, waxaad u baahan tahay inaad samayso baaritaan cusub.

## Maxaan ka fekeraa si aanan dadka kale u qaadsiin?

Cudrukan jabtada oo kale ahí waa cudur guud oo khatar ah sida uu qabo sharciga xakameynta caabuqyadu. Qofka qaba cudurkan jabtada oo kale ah ama looga shakisan yahay inuu qabo cudurkan waa inuu raacaa xeerar gaar ah, waxa loogu yeero xeerarka anshaxa (förhållningsregler).

### Xeerarka anshaxa (Förhållningsregler)

- Waa khasab inaad u sheegto qof kasta oo aad galmo la samaynayso inaad qabtid/laga yaabo inaad qabtid cudur sida jabtada oo kale ah.
- Waa khasab inaad isticmaasho wax difaac ah (kondom) haddii aad galmo samaynayso inta aan daawayntaada/dhiigaga lagaa qaaday aanay diyaar noqon ka hor.
- Waa khasab inaad dib ugu soo laabato booqashada dhakhtarka haddii lagugu guubaabiyo.

Haddii aad heshay xeer anshaxa ah oo aad u arakto inuu khaldan yahay, waxaad la xidhiidhi kartaa dhakhtarka cudurrada faafa ee gobolkaaga.

Marka aad qabto cudurkan sida jabtada oo kale ah (klamydia), waa in aanad halis gelin dadka kale. Waxa ugu ammaansan in aanad samayn galmo ama nooc kale oo galmo ah 10 maalmood ka dib markaad bilowdo inaad qaadato kiniinka antibiyootiga. Si kastaba ha ahaatee haddii aad galmo samayso, waa inaad u sheegtaa qofka in aad qabto cudur sida jabtada oo kale ah oo aad isticmaashaan wax difaac ah(kondom).

## Raad raaca caabuqa

Aad ayey muhiim u tahay in la helo dadka qaba cudurkan jabtada oo kale ah si ay u helaan daaweyn, qayb ahaan si loo yareeyo khatarta dhaawacyada uu keeno cudurku (eeg kor), qayb ahaana si looga hortago in cudurka caabuqu uu ku faafo dad badan.

Sida uu dhigayo sharciga ilaalinta caabuqyadu, waa khasab inaad ka qaybqaadato raad raaca caabuqa. Taas macneheedu waxaa weeye in aad bixiso macluumaad ku saabsan qofka aad galmada la samaysay. Mararka qaarkood waxaa loo baahan yahay in dib loogu noqdo ilaa hal sano.

Waxa aad sheegtaa waa sir (qarsoodi) dadka aad wax ka sheekaynaysaana ma ogaan doonaan qofka aad adigu tahay. Waxaa keliya ee loo sheegi doonaa waa inay tijabo iska soo qaadaan. Xogahan sidoo kale laguma qori doonto diiwaankaaga caafimaadka ee laakiin waxaa lagu qori doontaa waxa loogu yeero dukumeentiga raad raaca caabuqa.

## Macluumaad dheeraad ah

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cudurkan sida jabtada oo kale ah waxaa laga heli karaa 1177, Youmo (dadka da'doodu u dhaxayso 13 ilaa 20 sano ee ku doonaya macluumaadka luqad kale) iyo UMO (Qaabbilaada dhalinyarada ee internetka).

www.1177.se www.youmo.se www.umo.se

## Warqad ku saabsan ka hortagga caabuqyada faafa

Warqada ka hortagga caabuqyada faafa waxaa soo saaray Ururka caafimaadka ka kortagga caabuqyada waxayna khuseysaa ilaa heer qaran.